



WASHINGTON

Exposure Notifications

Waa maxay Ogaysiis yada Qaadista Caabuqa ee Washington?

Washington Exposure Notifications (Ogaysiis yada Qaadista Caabuqa ee Washington) (oo sidoo kale loo yaqaano Aalada Ogeysiis yada WA (Wa Notify)) waa aalad ku shaqaysa taleefannada casriga ah, adoon la wadaagin xogtaada shaqsiga ah, si aad ugu digto isticmaalayaasha kale haddii laga yaabo inay la joogeen dad qaba caabuqa COVID-19. Gabi ahaanba waa mid qarsoodi ah, mana taqaano qofka aad tahay iyo meesha aad aadayso.

Sidee ayay u shaqaysaa?

Markaad furato WA Notify, taleefankaaga ayaa la wadaagaaya koodhadh isku dhafan, oo qarsoodi ah taleefannada dadka kuu dhawdhaw ee ay sidoo kale u furan tahay aalada WA Notify. Abku wuxuu adeegsadaa tignooloojiyada Bluetooth Low Energy (BLE, Bluetoothka Aan Tamarta Badan U baahnayn) si uu taleefanada iskaga gudbiyo koodhadhkaan iskudhafan asagoon cidna tusin wax xog ah oo kugu saabsan. Haddii qof kale oo isticmaala WA Notify oo kuu dhawaa labadii asbuuc ee lasoo dhaafay gudahood xili danbana laga helo caabuqa COVID-19 uuna koodhikiisa xaqijintu gasho abka, waxaad heli doontaa ogaysiis qarsoodi ah oo kuu sheegaayo in laga yaabo inaad caabuqa qaaday. Tani waxay kuu sahlaysaa inaad hesho daryeelka aad u baahan tahay si dhakhso ah waxayna gacan ka gaysanaysaa kahortaga inaad caabuqa COVID-19 qaadsiiso dadka kale ee kuu dhawdhaw.

Sidee ayay ii caawinaysaa?

Daraasaad ayaa lagu oggaaday in hadba intay badan yihiin dadka adeegsada ogaysiiska qaadista caabuqu, ay sii kordhinayso faa'iidata aalada. Tijaabooyin laga qaaday saddex degmo oo katirsan Gobalka Washington ayaa muujinaaya in haddii tiro yar oo dadka kamid ah ay isticmaalaan WA Notify ay yarayn doonto caabuqa iyo dhimashada. Si lamid ah xirashada maaskarooyinka, kala fogaanshaha iyo yaraynta dadka isku imaanaaya, WA Notify waa qalab kale oo gacan ka gaysanaaya kahortaga faafida COVID-19.

Sidee ayaa loo difaacayaa sirtayda?

WA Notify waxaa lagu dhisay tignooloojiyada Ogaysiiska Qaadista Caabuqa oo ay sameeyeen Google iyo Apple, taasoo loogu talagalay in lagu difaaco xogta isticmaalaha. Nidaamku marna ma aruursho ama lama wadaago xogta goobta ama xogta shaqsiga ah shirkada Google, Apple, Washington State Department of Health (DOH, Waaxda Gobalka Washington uqaabilسان Caafimaadka), ama isticmaalayaasha kale. Ka qaybgalkaagu waa ikhtiyaari gabii ahaanba. Iisticmaalayaashu waxay ka qaybgeli karaan ama ka bixi karaan aalada markay doonaan.

Sidee ayaan WA Notify ugu shubayaa taleefankayga?

Markaad isticmaalayo iPhone , ka fur Ogaysiis yada Qaadista caabuqa qaypta Settings (sitinka):	Markaad isticmaalayo Android:
<ul style="list-style-type: none">- Gal Settings- Hoos u dooro Ogaysiis yada Qaadista Caabuqa- Guji "Turn On Exposure Notifications (Fur Ogaysiis yada Qaadista Caabuqa)"- Dooro United States (Maraykanka)- Dooro Washington	<ul style="list-style-type: none">- gal kaydka Google Play Store- Soo degso abka Ogaysiis yada Qaadista Caabuqa ee Washington

Maxay Washington u dooratay aaladaan?

Washington waxaa u dhisan kooxda kor joogtaynta, ayna ku jiraan khubarada ammaanka iyo adeegyada madaniga ah iyo xubno kasocda bulshooyinka kaladuwan, si ay dib u eegis ugu sameeyaan aaladaan Apple/Google. Kooxda ayaa ku talisay in aalada la dhaqan gasho ayadoo laga eegaayo waxtarka la xaqijiyyah ee aalada, difaaca adag ee xogta iyo inay gobalada kale adeegsadaan.